<table>
<tr><td rowspan="4">☒ XEERKA<br>☐ HABRAACA<br>☐ HEERKA DARYEELKA<br>☐ TILMAAMAHA HABRAACA<br>☐ HEERKA LOO SAMEEYAY<br>☐ WAX KALE</td><td>TAARIIKHDA LA ANSIXIYAY:<br>Luulyo 2023</td><td>BUUG GACMEED:<br>Xeerka Isbitaalka</td></tr>
<tr><td></td><td>RAADRAACA:<br>HPM 7-11</td></tr>
<tr><td colspan="2">CIWAANKA:<br>BARNAAMIJKA KAALMADA DHAQAALE (XEERARKA QIIMO DHIMISTA LACAG BIXINTA IYO DARYEELKA SAMAFALKA)</td></tr>
<tr><td colspan="2">WAXAA SAMEEYAY<br>Dhammaan waaxaha RCHSD ee masuulka ah, oo ay kamid yihiin Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka la xariira Dakhliga, Helida Bukaanka iyo La-taliyaasha Dhaqaalaha</td></tr>
</table>

## 1.0 UJEEDO:

1.1 Si loo sameeyo Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha (Financial Assistance Program, FAP) ee Rady Children's Hospital- San Diego (Isbitaalka) ee la xariira bukaan-jiifkaa isbitaalka iyo adeegyada bukaan socodka, oo ay kamid yihiin daryeelka caafimaadka ee xaalada gurmadka degdega ah iyo daryeelka caafimaad ahaan muhiimka ah, ayadoo loo maraayo siyaasadaha iyo habraacyada labadaba daryeelka samafalka ah iyo lacag bixinada qiimo dhimista ee ay helaan dadka dhaqaale ahaan u qalma. Isbitaal waxaa loola jeeda dhukumiintigaan guud ahaan Rady Children's.

## 2.0 QEEXITAANADA:

2.1 **Qadarka Guud ee Kharashka Biilka (Amounts Generally Billed, AGB)** waxa ka micnaysan tahay waa habka dib u eegis ee uu isticmaalo Rady Children's si loo xisaabiyo xadka kharashka ka qaybgalayaasha Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha.

2.2 **Diiwaanka Qeexitaanka Kharashka (Charge Description Master, CDM)** waxay ka micnaysan tahay nidaam guud ahaaneed oo la xariira kharashaadka Rady Children's ee lagu dalacaayo dadwaynaha marka la siiyo adeeg ama shey, oo ay kujiraan kooxda cudurada baaraha, ayadoon la eegeyn cida lacagta bixinaysa.

2.3 **Daryeelka Samafalka** waxay ka micnaysan tahay daryeelka samafalka buuxa ama daryeelka samafalka ee qaybta ah midkood. **Daryeelka Samafalka ee Buuxa** waxaa loola jeedaa adeegyada daryeelka caafimaadka ee bilaashka ah, oo la filaayo in bukaanku/damaanad qaaduhu uusan bixin wax lacag ah marka laga reebo qaybta ay bixiyaan caymiska. **Daryeelka Samafalka Qaybta ah** waxaa loola jeedaa bukaanka/damaanad qaadah lama filaayo inay bixiyaan qayb kamid ah kharashaadka.

2.4 **Barnaamijka Dheefta Wadaagista Kharashka (Cost Sharing Benefit Program, CSBP),** waa barnaamij ku saleysan xubunimo (bil walba sida caadiga ah) oo ay dadka xubinta ka ah bixiyaan khidmada xubinimada iyo kharashaadka kusoo aada bil kasta si loogu maareeyo kharashaadkooda caafimaadka. Caadiyan barnaamijka dheefta ma aqbali doono in kharashaadka si toos ah loogu dalaco waxayna heshiis kula jiraan xubnahooda si ay dib ugu celiyaan kharashaadka caafimaadkooda.

2.5 **Qiimo Dhimsita Lacagta** waxaa loola jeedaa waa marka Isbitaalka ogaado in bukaanku uusan u qalmin Daryeelka Samafalka ee Buuxa laakiin uu u qalmo qiimo-dhimis lagana filayo inuu qayb ahaan bixiyo kharashaadka. Tani waa nooc kamid ah Daryeelka Samafalka ee Qaybta ah.

2.6 **Dhakhtarka Xaaladaha Degdega ah** waxaa loola jeedaa dhakhtar takhasus leh oo ah xubin ka tirsan Shaqaalaha Caafimaadka Isbitaalka oo uu la xariiro Isbitaalku marka loo baahan yahay adeegyada caafimaadka xaaladaha degdega ah ee lagu bixiyo Waaxda xaalada Gurmadka Degdega ah (Emergency Department, ED). “Dhakhtarka Xaaladaha Degdega ah” kama mid ahan dhakhtarka khabiirka ah ee aan looga wicin Waaxda Xaaladaha degdega ah (ED) ama dhakhtarka ka tirsan shaqaalahan, ama leh mudnaanta, kana tirsan isbitaalka gaar ahaan qayb aha kabaxsan Waaxda Gurmadka Xaaladaha Degdega ah (ED).

2.7 **Kharashka Nolasha Muhiimka u ah** waxaa loola jeedaa kharashaadka ku baxa mid uun kamid ah waxyaabahan soo socda: kirada ama lacag bixinta guriga iyo dayactirka; sahayda cuntada iyo alaabaha guriga; korontada iyo taleefoonka; dharka; lacagta lagu bixiyo caafimaadka iyo ilkaha; caymiska; dugsiga iyo xanaanada caruurta; taageerada ilmaha iyo lamaanaha; kharashka gaadiidka iyo baabuurta, oo ay kujiraan caymiska, gaaska, iyo dayacyirka; lacagaha sida yaryar loo bixiyo; dhar dhaqista iyo nadiifinta; iyo kharashaadka kale ee xad dhaafka ah.

2.8 **Qoys** ama **Qoyska Bukaanka** waxaa loola jeedaa, bukaanada jira 18 sano iyo kasii wayn, lamaanaha bukaanka, lamaanaha guriga ka diiwaangashan, ilmaha ku tiirsan ee ka yar 21 sano, haddii uu guriga ku nool yahay iyo haddii kaleba. Marka laga hadlaayo bukaanada ka yar 18 sano, Qoys waxaa kujira waalidka bukaanka, qaraabada daryeelka siisa, iyo carruurta kale (ee ka yar 21 sano) ee uu bukaanku dhalay ama qaraabada daryeelka siineysa ay dhashay.

2.9 **Ka qaybgalaha FAP** waxaa loola jeedaa Bukaanka Rady Children’s ee Dhaqaale ahaan U qalma.

2.10 **Heerka Saboolnimada Dawlada Dhexe/Tilmaamaha Saboolnimada Dawlada Dhexe ( Federal Poverty Level, FPL)** waxaa loola jeedaa tilmaamaha saboolnimada ee hadba muddo kadib lagu cusbooneysiiyo Diiwaanka Dawlada Dhexe ee ay sameyso Waaxda Adeegyada Dadwaynaha iyo Caafimaadka Mareykanka, laguna daabaco barta http://aspe.hhs.gov/poverty.

2.11 **Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha (FAP)** waxaa loola jeedaa barnaamijka Rady Children's ee lagu qeexay xeerkaan iyo habraacaan looguna talagalay inuu caawiyo Bukaanada Dhaqaale ahaan U qalma si ay u helaan Lacag bixino Qiimo jaban ama Daryeelka Samagalka ee la xariira adeegyada Isbitaalka iyo adeegyada Dhakhtarka Xaaladaha Degdega ah.

2.12 **Bukaanka Dhaqaale ahaan u Qalma** waxaa loola jeedaa:

2.12.1 Bukaan aan caymis ku jirin oo dakhliga qoyskiisuna yahay ama ka yar yahay 550% heerka FPL; ama

2.12.2 Bukaan caymis kujira ama Bukaan CSBP oo aan caymis oo lagu soo dalacay Kharashaad Caafimaad oo aad u badan oo Dakhliga qoyskiisa yahay ama ka yar yahay 450% heerka FPL; ama

2.12.3 Bukaan caymis kujira ama Bukaan CSBP oo aan caymis kujirin oo lagu soo dalacay Kharashaad aan caymiska lagu daboolin oo Dakhliga qoyskiisa yahay ama ka yar yahay 450% heerka FPL; ama

2.12.4 Bukaan, haddii uu leeyahay caymis, haddii uusan lahayn ama yahay xubin katirsan CSBP, oo lagu soo dalacay Kharashaad Caafimaad oo aad u badan.

2.13 **Damaanad qaade** waxaa loola jeedaa qof ay saaran yihiin masuuliyada dhaqaale ee la xariira adeegyada daryeelka caafimaadka bukaanka, caadiyan bukaanka, waalidka, ama masuulka sharciga.

2.14 **Kharashaadka badan Caafimaadka** waxaa loola jeedaa wax uun kamid ah waxyaabahaan soo socda, sida lala xariirinaayo taariikhda adeega

2.14.1 Kharashaadka Sanadlaha ah ee laga bixiyo jeebka oo sida saxda ah loogu bixiyay adeegyada uu bukaanka ka helay Isbitaalka ee dhaafaya 10% Dakhliga Qoyska inta lagu jiray 12 kii billood ee lasoo dhaafay (lagu go'aamiyey in la is barbar dhigo bukaanka/dammaanad qaadka kharashka jeebka ka soo baxay ee bukaanka iyo dakhliga qoyska Bukaanka isla muddada 12 bilood kahor). Tusaale, haddii bukaanka/damaanad qaaduhu soo gudbiyo Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha (Financial Assistance Application, FAA) bisha Janaayo 1deeda, dhukumiintiga dakhliga iyo kharashaadka waa in la bixiyo kahor Janaayo 1deeda ilaa Diseembar 31deeda.

2.14.2 Kharashaadka sanadlaha ah ee jeebka laga bixiyay ee sida dhabta ah loogu bixiyay kharashka bukaanka ka galay Isbitaalka ee dhaafaya 10% dakhliga qoyska ee hadda. Marka dakhliga hadda loo isticmaalo aasaaska go'aaminta, la-talinta maaliyada waxay isticmaali doontaa dakhliga laga bilaabo bisha codsiga kaalmada dhaqaalaha (FAA) waxayna ku dhufan doonaan 12 si loo go'aamiyo dakhliga sanadka ee la saadaaliyay.

2.14.3 Kharashaadka jeebka ka baxsan ee sanadlaha ah ee sida dhabta ah loo siiyay bukaanka in ka badan 10% dakhliga qoyska 12 bilood ee lasoo dhaafay ama dakhliga qoyska ee hadda jira haddii bukaanka/damaanad qaaduhu bixiyo dhukumeentiyada kharashyada caafimaadka ee la bixiyay 12 bilood ee lasoo dhaafay (waxaa lagu go'aamiyay isbarbardhigga wadarta kharashyada caafimaadka, oo ay ku jiraan kharashka aan isticmaalin Isbitaalka, iyo kharashka sida dhabta ah loo siiyay bukaanka ee dakhliga Qoyska Bukaanka). Haddii dakhliga hadda la isticmaalo, la-talinta dhaqaale waxay isticmaali doontaa dakhliga laga bilaabo bisha codsiga kaalmada dhaqaalaha (FAA) waxayna ku dhufan doonaan 12 si loo go'aamiyo dakhliga sanadka ee la saadaaliyay.

2.14.4 Risiitka(yada) ama qaansheegta(yada) ee kharaashaadka la bixiyay waa inay kujiraan codsiga kaalmada dhaqaalaha (FAA) damaanad qaadaha. Caddeyn saxiixaan looma aqbali doono sida caddeynta Kharashaadka Caafimaadka aadka u Badan.

2.15 **Bukaan Caymis Leh**waxaa loola jeedaa bukaan ku jira caymis uu Dhinac Saddexaad Daboolo, sida shirkad bixiya caymiska caafimaadka, Qorshaha Caymiska daryeelka caafimaadka, Medicare, ama Medicaid.

2.16 **Adeegyada Caafimaad ahaab Muhiimka ah** waxaa loola jeedaa adeegyada macquulka ah muhiimna u ah si loo ilaaliyo nolal, si looga hortago xanuun aad u daran ama naafonino aad u wayn, ama si wax looga qabto xanuun daran ama dhibaato ayadoo loo maraayo oggaanshaha xaalada ama daaweynta cudurka, xanuunka ama dhaawaca, ahna labadaba mid maskaxeed iyo mid jireedba, sida uu oggaaday xirfadle caafimaad oo ruqsad haysta oo ku shaqeynaya heerka xirfadiisa caafimaad.

2.17 **Hantida Diyaarka ah** waxaa loola jeedaa hantida diyaar u ah in loo badelo lacag kaashka ah, sida akoonaadka baanka iyo saamiyada dadwaynuhu kala wareegsadaan, laakiin ma ahan hanti cad sida hantida dhabta ah. Hantida Diyaarka ah qayb kama ahan hawlgabka ama qorshooyinka magdhowga, midkood $10,000 koowaad ee Hantida Lacageed, ama 50% Hantida lacageed wixii ka badan $10,000 ayaa loo xisaabin doonaa in lagu go'aamiyo u qalmida FAP ee lagu saleeyo hantida lacageed.

2.18 **Xeerka Kahortaga Kharashaadka Lama filaanka ah** waxaa loo adeegsadaa isbitaalada iyo daryeel bixiyaasha; waa qaabka federaalku ku dhowro dhaqaalaha iyo macluumaadka shaqsiyaadka lagu daboolay qorshooyinka ganacsiga wuxuuna xadid cusub duldhigaa kharashka haraadiga ah iyo kharashka bukaanka lala wadaago gar ahaan bukaanada aan caymiska kujirin.

2.19 **Dakhliga Qoyska/Bukaanka** waxaa loola jeedaa dakhliga lasoo xisaabiyo sidaan soo socota: Dakhliga guud ee Qoyska iyo Bukaanka kahor intaan canshuuraha laga jarin. Qorshayaasha magdhawga hawlgabka ama dib u-dhigista ee u qalma sida uu dhigayo Xeerka Dakhliga Gudaha, ama qorshooyinka magdhawga dib loo dhigay, laguma dari doono dakhliga ama xisaabinta hantida.)

2.20 **Qorshaha Lacag bixinta** waxaa loola jeedaa lacag bixinada bilaha ah oo ay ku heshiiyeen Isbitaalka iyo bukaanka/Damaanad qaadaha.

2.21 **Bukaanada Lacag Ayagu iska Bixiyaan** waxaa loola jeedaa bukaana aanaan isticmaalin ama doorta inusuan isticmaalin caymis caafimaad oo dhinac saddexaad bixiyo, qorshaha adeegga daryeelka caafimaadka, Medicare, ama Medicaid, iyo bukaanada dhaawacoodu aanu ahayn dhaawac magdhow leh oo lagu helaayo magdhowga shaqaalaha, caymiska baabuurta, ama caymis kale sida uu go'aamiyey oo uu diiwaangeliyey Isbitaalku.

2.22 **Bukaanada Dhaqaale ahaan U qalma Inay Lacagta Iska Bixiyaan** waa Bukaanada aan lahayn wax caymis ah oo ay ka helaan Dhinac Saddexaad ama Caymis Dhinac Saddexaad oo kale iyo dakhliga Bukaanka/qoyskuna uusan dhaafeyn 550% heerka FPL. Bukaanada Dhaqaale ahaan U qalma Inay Lacagta Iska Bixiyaan waxaa kamid noqon kara bukaanada Daryeelka Samafalka qaata.

2.23 **Caymiska Dhinac Saddexaad** waxaa loola jeedaa caymis uu bixiyo Dhinac Saddexaad ayadoo loo maraayo Barnaamijka Dheefta Wadaagista Kharashka.

2.24 **Bixiyaha Dhinaca Saddexaad ah** waxaa loola jeedaa caymis bixiyaha gaar ah ama shirkad bixisa dheefaha caymiska ayadoo masuul ka ah qofka caymiska qaadanaya, dib u bixinaysa oo maareynaysa kharashaadka daryeelka caafimaadka wuxuuna bixiyaa caymis caafimaad oo ay kujiraan caymiska lagu bixiyo Iswaydaarsiga Dheefta Caymiska Caafimaadka, Magdhowga Shaqaalaha, caymiska baabuurta, iyo sidoo kale barnaamijka caymiska daryeelka caafimaadka sida Medi-Cal, CCS, Tricare, Medicare, CHAMPUS, Healthy Families.

2.25 **Masuuliyada Dhinaca Saddexaad (Third Party Liability, TPL)** Masuuliyada Dhinaca Saddexaad waxaa loola jeedaa qof ama shirkad oo aan ka ahayn bukaanka ama Isbitaalka ayaa lagu eedeeyay ama dusha laga saaray inay masuul ka tahay sharci ahaaqn kharashaadka caafimaadka bukaanka iyo adeegyada daryeelka caafimaadka ee muhiimka ah, caadiyan ka dhasha dhaawac soo gaaray bukaanka.

2.26 **Bukaanka aan Kujirin Caymis** waxaa loola jeedaa bukaanka nool bilaa caymis oo aan wax caymis ah ka helin Dhinaca Saddexaad.

2.27 **Bukaanka CSBP ee aan Kujirin Caymiska**waxaa loola jeedaa bukaanada aan kujirin wax caymis ah oo xubnaha ka ah Barnaamijka Wadaagista Dheefta Kharashka

## 3.0 XEERKA:

3.1 Waa xeerka Rady Children’s inay bixiso kaalmada dhaqaale ee loo maraayo Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha Rady Children’s (FAP) si ay u siiso

3.1.1 Bukaanada aan caymiska ku jirin oo dakhliga qoyskooduna yahay ama ka yar yahay 550% heerka FPL;

3.1.2 Bukaanada ku jira caymiska ama Bukaanada CSBP ee aan caymis kujirin oo lagu soo dalacay Kharashaad Caafimaad oo aad u badan Dakhliga qoyskooduna yahay ama ka yar yahay 450% heerka FPL;

3.1.3 Bukaanada ku jira caymiska ama Bukaanada CSBP ee aan caymis kujirin oo lagu soo dalacay Kharashaad aan caymiska lagu daboolin oo Dakhliga qoyskooduna yahay ama ka yar yahay 450% heerka FPL; iyo

3.1.4 Bukaanada aan caymiska kujiran, Bukaanada Caymiska kujira iyo Bukaanada CSBP ee aan caymiska lahayn ee lagu soo dalacay Kharashaad Caafimaad oo aad u Badan.

## 4.0 HABRAACYADA:

### 4.1 MAAMULKA BARNAAMIJKA

4.1.1 Rady Children’s waxay barnaamijka FAP u maamushaa si ay kaalmo Dhaqaale u siiso Bukaanada u qalma ee helaya lacag bixinada qiimo dhimista iyo/ama Daryeelka Samafalka ee la xariira adeegyada Isbitaalka iyo adeegyada Dhakhtarka Xaaladaha Degdega ah.

### 4.2 HABRAACA CODSIGA

4.2.1 Si loo codsado barnaamijka FAP iyo codsiga go'aaminta u qalmida, bukaanka/damaanad qaaduhu waa inuu soo gudbiyo Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha waana inuu usoo gudbiyo Waaxda La-talinta Dhaqaalaha.

4.2.2 Dhammaan bukaanada aan caymiska kujirin iyo/ama damaanad qaadayaasha codsanaya kaalmada dhaqaalaha waxaa laga filayaa inay dalbadaan dookhyada caymiska caafimaadka dadwaynaha, oo ay kujiraan laakiin aan ku koobneyn Medi-Cal ama Adeegyada Carruurta Califonia, kahor inta Rady Children’s aysan gaarin go'aanka kama dambeysta ah ee u qalmida FAP. Haddii la diido, Rady Children’s waa inuu helo nuqulka diidmada. Shaqaalaha la-talinta shaqaalaha ee Rady Children’s waxay sameyn doonaan dadaal kasta oo macquul ah si ay qoysaska oga caawiyaan codsashada barnaamijka FAP ee Rady Children’s si ay u buuxiyaan codsiga ayna u helaan dookhyada maalgelinta dawlada ee laga yaabo inay u qalmaan. Ku guuldareysiga u hogaansanaanta nidaamka codsiga ama bixinta dhukumiintiga la iskaga rabo waxaa la dhalan kara in barnaamijka lagaa joojiyo. Ku guuldareysiga kasta ah ee uu sameeyo bukaanku/damaanad qaadaha waxaa ka dhalan kara in Rady Children’s awoodi wayso inay bixiso kaalmada dhaqaalaha.

4.2.2.1 Haddii bukaanku/damaanad qaaduhu seego waqtiga kama dambeysta ah ee lagu codsanaayo etro-active Medi-Cal ama caymis kale oo ah adeeg taariikh go'an la bixiyo, bukaanka/damaanad qaaduhu waa inuu la shaqeeyo Waaxda La-talinta Dhaqaalaha ee Rady Children’s si ay u codsadaan caymis socda kahor inta aan la gaarin heer aad u wanaagsan. Haraadiga lacag-bixinta waxaa loo tixgalin doonaa FAP-ga Rady Children’s.

4.2.3 Bukaanada kujira caymiska iyo/ama damaanad qaadaha ama bukaanada CSBP ee aan kujirin caymiska ee codsanaya kaalmada dhaqaalaha ee la xariirta haraadiga ka haray lacagta bukaanku masuulka ahaa (tusaale, qayb bixinta caymiska, lacagaha la jaro ama qoondada caymiska ee uu doonaayo qorshaha caymiska) waxa laga yaabaa in la waydiiyo inay raacaan caymiska caafimaadka dadweynaha ee labaad sida lagu qeexay 4.2.2. haddii baaritaanka hore ee dhaqaalaha uu muujinayo u-qalmitaanka suurtagalka ah. Ku guuldareysiga kasta ah ee uu sameeyo bukaanku/damaanad qaadaha waxaa ka dhalan kara in Rady Children’s awoodi wayso inay bixiso kaalmada dhaqaalaha.

4.2.4 Bukaanka/damaanad qaadaha waxaa la siin doonaa 21 maalmood oo laga bilaabaayo taariikhda maalinta koowaad ay soo gudbiyaan codsiga si ay u sameeyaan dadaal kasta oo macquul ah si ay u bixiyaan waxyaabahaan soo socda:

4.2.4.1 Dhukumiintiga Bukaanka/dakhliga qoyska. Dakhliga waxaa lagu xaqiijin karaa ayadoo loo maraayo wax uun kamid ah hababkaan soo scoda. Dhukumiintiga waa in la bixiyo isla sanadka bukaanku/ damaand qaaduhu soo gudbiyo FAA-gooda. Marka ay jiraan canshuur celino, soo noqoshada ugu dambeysay ee kahor taariikhda FAA uu soo gudbiyo bukaanka/dammaanad qaaduhu waa in la bixiyaa:

4.2.4.1.1 Canshuur celinada (ayaa la doorbiyaa)

4.2.4.1.2 Jeegaga mushaarka oo dhawaan la bixiyay/jeegag xawaalad ama taleefoon

4.2.4.1.3 xaqiijin ay sameyso shirkad

4.2.4.1.4 Haddii bukaanku/damaanad qaaduhu uusan awoodin inuu bixiyo dhukumiintiga dakhliga, Rady Children’ wuxuu go'aan u gaar ah ku gaari karaa inuu bukaanka/damaanad qaadaha oga baahda caddeyn la saxiixaayo oo ay ka dhalanayso ciqaab haddii laga been sheego laguna sheegaayo (i) runta xogta dakhliga kasta oo lagu bixiyay foomka codsiga kaalmada dhaqaalaha, (ii) sharaxaada sababta aysan u bixin dhukumiintiga dakhliga, iyo (iii) caddeynta saxnaanta xisaabaadka dakhliga ee Rady Children’s.

4.2.4.2 Dhukumiintiga hantida haddii (a) la codsanaayo Daryeelka Samafalka iyo (b) haddii ay codsado Rady Children’s.

4.2.4.3 Dhukumiintiga kharashaadka caafimaadka, oo ay kujiraan meelaha ay khuseeyaan kharashaadka caafimaadka ee aan lagu gelin Isbitaalka, oo sida saxda ah loogu bixiyay bukaanka 12 kii billood ee lasoo dhaafay. Kharashaadka uu galay damaanad qaadaha, oo aan la xariirin bukaanka, lama tixgelin doono.

4.2.4.4 Dhukumiintiga joogista ama maqnaanshaha ee Caymiska Dhinac Saddexaad (shirkad caymis oo gaar loo leeyahay oo ay kujiraan caymiska lagu bixiyo Sarifka Dheefaha Caafimaadka California (California Health Benefits Exchange), Medi-Cal, CCS, Tricare, Medicare, Magdhowga Shaqaalaha, caymiska baabuurta, ama kuwo kale).

4.2.4.5 Dhaafitaanada ama shaacin Rady Children’s u oggolaanaya inay helo xogta akoonka dhaqaalaha ama shirkadaha ganacsiga, ama (haddii ay khuseyso) shirkadaha kale ee haya hantida.

4.2.4.6 Rady Children’s waxaa laga yaabaa asagoo adeegsanaya go'aan u gaar ah inuu waqti dheeraad ah siiyo bukaanka/damaanad qaadaha si ay u keenaan dukumiinti taageeraya codsiga, tusaale ahaan mararka Rady Children’s codsado macluumaad dheeraad ah kadib 21 maalmood oo laga bilaabaayo taariikhda codsiga.

## 4.3 GO'AAMINTA U QALMIDA

4.3.1 Waaxda La-talinta Dhaqaalaha Rady Children’s waxay:

4.3.1.1 Go'aamin doontaa u qalmida FAP sida ugu dhaqsiyaha badan kadib marka la dhameeyo hawsha codsiga kore.

4.3.1.2 Akoonka bukaanka ka dhigi doontaa mid Kharashka asagu iska bixiyo inta hawsha go'aaminta u qalmida socoto.

4.3.1.3 Marka codsiga kaalmada dhaqaalaha oo buuxa la gudbiyo, Waaxda La-talinta Dhaqaalaha waxay gaari doontaa go'aanka u qalmida FAP ee kama dambeysta ah kahor inta aan lasii wadin tallaabooyin kasta oo horey loo gaaray.

4.3.1.4 Sameyn doontaa tixgelin waxayna qaadi doontaa tallaabo macquul ah marka bukaanku/Damaanad qaaduhu ku guuldareysto inuu bixiso dukumiinti macquul ah ahna muhiim sida uu dhigaayo xeerkaan si loogu taageero codsigooda FAP. Haddii dukumiintigu muhiim u yahay go'aaminta FAP, Rady Children’s waxaa laga yaabaa inay diido ka qaybgalka FAP haddii aysan awoodin inay gaarto

go'aaminta u qalmida. Haddii Rady Children's sameyn karto go'aamin macquul ah ayadoon helin dukumiinti, waxay sameyn doontaas dadaalkaas.

4.3.1.5 Ma sameyn doonto go'aanka kama dambeysta ah ee u qalmid la'aanta FAP ilaa laga jaago 150 maalmood taariikhda hore ee kharashka.

4.3.1.6 Go'aamin doontaa in bukaanku yahay Bukaan Dhaqaale ahaan u qalma oo qiimeyn lagu oggaaday inuu u qalmo lacag bixinada qiimo dhimista:

4.3.1.6.1 Dakhliga Bukaanka/Qoyska, sida lala barbardhigay heerka saboolnimada dawlada dhexe (FPL) si loo oggaado boqolkiiba FPL. Heerka saboolnimada dawlada dhexe (FPL) ee ka badan 550% uma qalmayso qiimaha qiimo dhimista kaalmada dhaqaake

4.3.1.6.1.1 Bukaanada caymiska kujira iyo Bukaanada CSBP ee aan caymiska kujirin ee lagu soo dalacay Kharashaadka Caafimaadka oo Badan ama kharashaad aan caymis lagu daboolin:

| FPL | Qiimaha Qiimo dhimista |
|---|---|
| Illaa iyo 400% | 100% Qiimaha Qiimo dhimista (Qayb Bixinta Lacagta sida ku xusan shaxda hoose) |
| Illaa iyo 450% | 75% Qiimaha Qiimo dhimista |

Qiimaha qiimo dhimista ee loogu talagalay Bukaanda aan caymiska kujirin iyo Bukaanada CSBP aan caymiska kujirin ee lagu soo dalacay Kharashaadka Caafimaad oo Badan ama Kharashaad aan Caymis lagu daboolin waxaa lagu dabaqi doonaa masuuliyada bukaanka, sida lagu go'aamiyay Caymiska Dhinaca Saddexaad.

4.3.1.6.1.2 Bukaanada Aan caymiska kujirin:

| FPL | Qiimaha Qiimo dhimista |
|---|---|
| Illaa iyo 400% | 100% Qiimaha Qiimo dhimista (Qayb Bixinta Lacagta sida ku xusan shaxda hoose) |
| Illaa iyo 450% | 75% Qiimaha Qiimo dhimista |
| Illaa iyo 550% | 50% Qiimaha Qiimo dhimista |

Qiimaha qiimo dhimista ee loogu talagalay Bukaanada aan Caymiska kujirin waxaa lagu dabaqi doonaa kharashaadka lagu sameeyo Nidaamka Qeexitaanka Kharashka ee Rady Children's.

4.3.1.6.1.3 Jadwalka Qayb bixinta lacagta (Oo kaliya loogu talagalay ka qaybgalayaasha kujira heerka ama ka hoosee 400% FPL)

| Adeegyada isbitaalka | Qayb Bixinta Lacagta |
|---|---|
| Booqashada Rugta Caafimaadka | $10.00/booqashadii |
| Booqashada daaweynta taxanaha ah | $10.00/bishii |
| Waaxda Xaaladaha degdega ah | $25.00/booqashadii |
| Xarunta Daryeelka Daruuriga ah | $25.00/booqashadii |
| Diiwaangelinta Bukaan Jiifka | $100.00/diiwaangelinta |
| Waaxda Xaaladaha degdega ah ee keenta in bukaanka la dhigo isbitaalka | $100.00/diiwaangelinta |
| Qalliinka Bukaan socodka ee Isbitaalka | $50/qaliinka bukaan socodka |

4.3.1.6.2 Xaalada caymiska ee bukaanada caymiska kujira ama kuwa aan caymiska kujirin, oo ay kujiraan kuwa laga helo barnaamijka daryeelka caafimaadka dawlada Dhexe ama kan gobalka.

4.3.1.6.3 Xubinimada Barnaamijka Wadaagista Dheefta Kharashka.

4.3.1.6.4 Kharashaadka caafimaadka ee sanadlaha ah ee lagu bixiyay bukaanka kahor 12 billood, oo ay kujiraan kharashka aan lagu gelin isbitaalka gudahiisa.

4.3.1.6.5 In bukaanku qabo Kharashaad Caafimaad oo Badan, ayadoo lagu ogaanaayo midkood:

4.3.1.6.5.1 isku barbardhigida kharashaadka jeebka laga bixiyay ee lagu bixiyay isbitaalka iyo Dakhliga Qoyska si loo go'aamiyo in kharashaadka jeebka laga bixiyay ay dhaafeen 10% heerka dakhliga Qoyska 12 kii billood ee lasoo dhaafay ama dakhliga hadda, ama

4.3.1.6.5.2 haddii bukaanku keeno dhukumiintiga kharashaadka caafimaadka ee la bixiyay 12 kii billood ee lasoo dhaafay, ayadoo la isku barbardhigaayo kharashaadka caafimaadka ee guud (oo ay kujiraan kharashka aan lagu dhexgelin Isbitaalka) ee sida saxda ah lagu bixiyay bukaanka iyo dakhliga Qoyska si loo go'aamiyo in kharashaadka jeebka ee sanadlaha ah ay ka badan yihiin 10% heerka dakhliga Qoyska. Dakhliga hadda oo ka duwan dakhligii sannadkii hore waa la isticmaali karaa. Haddii dakhliga hadda loo isticmaalo aasaaska go'aaminta, la-talinta maaliyada waxay isticmaali doontaa dakhliga bisha lasoo gudbiyay FAA waxayna ka dhigi doontaa mid sanad ah ayadoo (ku dhufanaysa 12 billood).

4.3.1.7 Go'aaminta in Bukanaka U qalma Dhaqaalaha uu u qalmo Daryeelka Samafalka ee Buuxa kadib marka la sameeyo qiimeyn:

4.3.1.7.1 Dakhliga Bukaanka/Qoyska, sida lala barbardhigay heerka saboolnimada dawlada dhexe (FPL) si loo ogaado inay tahay ama ka hooseyso 400% heerka FPL.

4.3.1.7.2 Hantida Rasmiga ah ee Bukaanka/Qoyska Bukaanka.

4.3.1.7.3 In adeega daryeelka caafimaad ee loo fidiyo bukaanka uu yahay mid caafimaad ahaan lagama maarmaan ah, mid la doortay ama dabiici ahaan. Rady Children’s oo gaaraysa go'aankeeda u gaar ah waxay diidi kartaa Daryeelka Samafalka ee la xariira adeegyada daryeelka caafimaadka ee aan caafimaad ahaan muhiimka ahayn.

4.3.1.8 Haddii bukaanka/damaanad qaadaha loo ansixiyo kaalmada dhaqaalaha, dhammaan xisaabaadka leh haraadiga iska bixinta kharashka ee wali taagan wakhtiga go'aanka ayaa loo hagaajin doona si waafaqsan dhimista boqolkiiba bukaanka/dammaanad qaadku u qalmo iyadoo lagu saleynaayo codsigooda. Tusaale ahaan, haddii damaanad qaadaha loo ansixiyo 50% qiimo dhimista kaalmada dhaqaalaha markay tahay Janaayo 1[deeda] iyo 5 kahor taariikhda adeega leh lacagta haraadiga ah, haraadiga la iska bixinaayo lacagta loogu talagalay mid walba oo kamid ah 5 taas akoon waxaa la yareyn doonaa 50%. Shaqaalaha La-talinta Dhaqaalaha waxay damaanad qaadaha ka caawin karaan inay dejiyo qorshaha lacag bixinta haddii ay jirto lacag ku hartay kadib marka la isticmaalo qiimo dhimisyada kaalmada dhaqaalaha.

4.3.1.9 U isticmaal go'aaminta u qalmida hore sidaan soo socda oo kaliya: Haddii bukaanku yahay mid hadda qayb ka ah FAP uuna dib ugu soo laabto Rady Children’s si uu u helo adeegyada daryeelka caafimaadka, ka qaybgalka FAP waxaa si toos ah loo kordhin doonaa ilaa 6 billood si uu u helo dhammaan adeegyada caafimaad ahaan muhiimka ah. Tusaale ahaan, haddii bukaanka/damaanad qaadaha marka koowaad loo ansixiyo samafal markay taariikhdu tahay Janaayo 1[deeda], ka qaybgalka FAP waxaa si toos ah loo kordhin doonaa si uu u helo dhammaan adeegyada caafimaad ahaan muhiimka ah ee dhacaya inta u dhaxeysa Janaayo 1[deeda] iyo Juun 30[keeda].

4.3.1.10 Rady Children’s wuxuu joojin karaa go'aanka kama dambeysta ah ee u qalmida FAP ee loogu talagalay akoonka bukaanka kadib haddii uu hesho xog iyo ogeysiis habboon oo muujinaya in adeegyada daryeelka caafimaadka bukaanka ee ka dhalatay TPL, inta lagu jiro go'aaminta dhageysiyada sharciga ee TPL. Haddii lagu saleeyo dib u eegista hore ee codsiga FAP, bukaankuna u qalmo FAP, markaas

Rady Children's waxay bayaanada bukaanka gelin doontaa hakad sababo la xariira xaalada natiijada TPL. Kadib marka la helo xogta iyo ogeysiiska habboon ee inay soo gabagaboobeyn dhegeysiyada sharciga ee TPL iyo si lamid ah natiijada ama xalka xaalada TPL, Rady Children's waxay dib u bilaabi doonaa codsiga FAP waxayna gaari doontaa go'aanka kama dambeysta ah ee u qalmida FAP.

4.3.1.11 Rady Children's waxay joojin kartaa go'aanka kama dambeysta ah ee u qalmida FAP ee bukaanada CSBP ee aan caymisku kujirin, kuwa CSBP-guudu doonaayo in lacagta si toos ah loogu celiyo bukaanka. Marka macluumaadka ku haboon iyo ogeysiiska lagu helo waqtiga lagu sheegay 4.2.4, laga soo bilaabo CSBP-da ee diidmada ama go'aaminta dheefta bukaanada CSBP ee aan caymiska kujirin ay dhaafto, Rady Children's waxay dib u bilaabi doontaa codsiga FAP waxayna samayn doontaa go'aanka ugu dambeeya ee u-qalmitaanka FAP.

## 4.4 QIIMO DHIMISTA LACAG BIXINADA (LACAG CELINTA UGU YAR EE LA FILAAYO)

4.4.1 Bukaanada uu Rady Children's go'aamiyo inay yihiin Bukaan Dhaqaale ahaan u qalma sida waafaqsan Qaybta 4.3.1.6 ee kore waxa la siin doonaa Lacag dhimis sida soo socota:

4.4.1.1 <u>Qiimo dhimista lacaga Isbitaalka lagu bixinaayo (**Dhammaan Ka qaybgalayaasha FAP**).</u> Rady Children's wuxuu codsan doonaa "Xadidka Lacag bixinta" si uu qiimo dhimis u siiyo dhammaan ka qaybgalayaasha FAP si ay u helaan adeegyada daryeelka caafimaadka ee uu isbitaalka bixiyo. Sida ku xusan, xadidkaan lacag bixintu waxay khusaysaa Bukaanka aan Caymiska lahayn ee dakhliga qoyskiisu yahay ama ka hooseeya 550% heerka FPL; Bukaanka Caymiska aan Lahayn iyo Bukaannada CSBP ee aan Caymiska Kujirin ee leh Kharash Caafimaad ee aadka u Badan iyo Dakhliga Qoyska ee ah ama ka hooseeya 450% heerka FPL; Bukaanka Caymiska kujira iyo Bukaannada CSBP ee aan caymis lahayn ee lagu soo dalacay kharashyo aan la daboolin iyo dakhliga qoyskoodu yahay ama ka hooseeya 450% heerka FPL; iyo bukaanada, haddii ay ahaan lahaayeen kuwo aan caymis lahayn ama caymis kujira ama xubin ka ah CSBP, kuwaas oo lagu soo dalacay Kharash Caafimaad oo aad u Badan.

4.4.1.1.1 Lacagaha ka qaybqaataha FAP waxay ku koobnaan doonaan cadadka Rady Children's ay ka filayaan si niyad sami ah inay ku helaan adeegyada isku midka ah ee ay bixiyaan Medicare, Medi-Cal, Healthy Families, ama barnaamij kale oo caafimaad oo ay dawladdu maalgaliso kaas oo Rady Children's ka qaybqaato, hadba kan ugu

weyn. Rady Children's wuxuu go'aamin doonaa xadidka lacag bixinta asagoo aqoonsanaya cadadka lacag celinta la filaayo ee lagu bixiyo isla adeegga, asagoo tixraacaya nidaamyada adeegga daryeelka caafimaadka (sida nidaamka dakhliga, HCPCS, CPT, ICD-9, APR). Hase yeeshee, majirti doonto mar uun lacagta bixintu dhaafi doonto cadadka guud ahaan lagu dalacay (AGB).

4.4.1.1.2 Lacag bixinada ka qaybqaataha FAP ee la xariira adeegyada isbitaalka ee aysan jirin lacag la go'aamiyeen Medicare ama barnaamij kale oo ay dawladu maalgeliso waxaa lagu koobi doonaa qiimaha CDM ee la dhimay si waafaqsan xeerkaan.

4.4.1.1.3 Lacag bixinada ka qaybqaataha FAP marna ma ka badan doonaan AGB gaar ahaan bukaanada caymiska gaar ah kujira. Rady Children's wuxuu go'aamiyaa AGB sida ku xusan HPM 7-55, Qiimaha Caddaalada ah ee Dhakhtarka Isbitaalka iyo ED.

4.4.1.1.4 Rady Children's wuxuu isticmaali doonaa hab miisaan oo kala dhigdhigan si uu ugu dallacaan ka qaybgalayaasha FAP boqolkiiba kharashyada ku xiran dakhliga bukaanka/qoyska. Arrintaan waxay keeni kartaa in lacag kala duwan lagu dalaco ka qaybgalayaasha FAP ee isla adeeg isku mid ah helay iyadoo ku xiran heerka dakhliga, laakiin lacagta la filayo marna kama badan doonto inta ugu badan ee uu oggol yahay xeerkaan.

4.4.1.2 Qiimo dhimista lacaga Isbitaalka lagu bixinaayo (**Qaar kamid ah Ka qaybgalayaasha FAP**). Rady Children's wuxuu codsan doonaa xadidkaan Lacag bixinta si uu qiimo dhimis u siiyo qaar kamid ah ka qaybgalayaasha FAP si ay u helaan adeegyada daryeelka caafimaadka ee uu isbitaalka bixiyo.

4.4.1.2.1 Bukaanka Caymiska Kujira iyo Bukaanada CSBP ee aan Caymiska Kujirin ee lagu soo dalacay Kharash Caafimaad oo aad u Badan iyo Dakhliga Qoyskooduna yahay ama ka hooseeyo 450% heerka FPL, Xadka Lacag-bixinta ee qaybta 4.4.1.1 ee sare ayaa lagu dabaqi doonaa qaybta kharashka ee ah mas'uuliyadda bukaanka, oo ay ku jiraan (kuwa aan caafimaadka la xariirin) Qayb bixinta Lacagta iyo lacagaha la jaro.

4.4.1.2.2 Lacag bixinta ka qaybgalayaasha FAP lagu soo dalacay Kharashyada Caafimaad oo aad u Badan waa la xadidi doonaa si lacag bixinuhu uga badnaan farxiga u dhexeeya cadadka lacag bixinta ee cid saddexaad oo bixiye ah iyo heerka ugu sarreeya ee loo dejiyay adeegga si waafaqsan CDM (eeg HPM 7-55, Isbitaalka & Qiimaynta Dhakhtarka ED.) Hase yeeshee, marna ma dhacayso in lacag bixintu ka badnaato AGB.

4.4.1.3 Rady Children's wuxuu isticmaali doonaan habkaan soo socda si uu xisaabiyo AGB:

4.4.1.3.1 Wuxuu adeegsan doonaa habka dib eegista sanadlaha ah (dib u eegista), kadib xirista sanad xisaabeedkii hore, sheegashada lacagaha sida dhab ah loogu bixiyay Isbitaalka ayadoo la adeegsanaayo Khidmada Medicare ee loogu talagalay adeeg guud oo ay la socdaan dhamaan caymisyada caafimaadka gaarka ah iyo CSBP.

4.4.1.3.2 Boqolkiiba AGB-da Sanadkii iyo qeexitaanka xisaabaadka waxaa lagu heli karaa qaab bilaash ah kadib marka laga codsado Xafiiska La-talinta Dhaqaalaha oo laga xariiri karo 858-9664005 ama kadib marka codsi qoraal ah loo diro 3020 Children's Way, MC 5055, San Diego, CA 92123-4282. Nuqul ayaa sidoo kale laga heli karaa webseedka Rady Children's https://www.rchsd.org/patients-visitors/financial-assistance/.

4.4.1.3.2.1 Xadidaada waxaa loo xisaabin doonaa sida tusaalahan oo kale:
Qiimaha CDM ($50)
- Lacag bixinta Caymisk ee Qolo Saddexaad ($25)
= Lacag bixinta Ugu badan ee Ka qaybgalaha Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale (FAP) ($25)

4.4.1.4 Qiimo dhimista Lacag bixinada Dhakhtarka Waaxda Xaalada Degdega ah.

4.4.1.4.1 Dhakhaatiirta Xaaladaha degdega ah ee Rady Children's waxay ku tiirsanaan doonaan go'aaminta isbitaalka ee u qalmida arnaamijka Kaalmada Dhaqaale (FAP).

4.4.1.4.2 Qiimo dhimista lacagaha adeegyada dhakhtarka Xaaladaha degdega ah ee Rady Children's waxay waafaqsanaan doonaan xeerkaan iyo habraaca marka laga reebo kala duwanaanshaha lagu xusay hoos.

4.4.1.4.3 Rady Children's waxay xaddidi doontaa lacagaha ay bixiyaan Ka qaybgalayaasha FAP ee ay ku bixiyaan adeegyada Dhakhaatiirta Xaaladaha Degdegga ah waxayna ka dhigi doontaa ilaa xad aan ka badnayn (a) 50% ee kharashyada la soo dallacay dhexdhexaadka ah ee ku salaysan xog uruurin qaran oo la aqoonsan yahay lana xariirta kharashka dhakhtarka marka xogta kaydka la doorto ama (b) 50% ee kharashyada dhabta ah ee la soo dalacday iyadoo la isticmaalayo Cabirka Qiimaha Qeexitaanka Kharashka Rady Children's.

## 4.5 DARYEELKA SAMAFALKA LACAG LA'AANTA AH/BUUXA

4.5.1 Bukaanada kharashka iska bixiya ee dakhliga qoyskoodu uusan ka badneyd 400% heerka saboolnimada dawlada dhexe (FPL) waxay heli doonaa Daryeelka Samafalka ee leh kharashka ugu yar oo aan ka badneyd $100.

4.5.2 Adeegyada aan caafimaad ahaan muhiimka ahayn ee caadi ahaan isqurxinta la xariira kaliya ayaa u qalma Daryeelka Samafalka ee Rady Children's ayagoo go'aankeeda kaliya ah ku saleynaysa.

## 4.6 U QALMIDA AAN AADKA U CADDEYN

4.6.1 Si ka duwan habka codsiga caadiga ah ee lagu qeexay qaybta 4.2, bukaanada waxaa sidoo kale loo qaadan karaa inay u qalmaan kaalmada dhaqaalaha iyadoo lagu saleynaayo caddaynta la bixiyay loona marayo isticmaalka qalabka baaritaanka dhinac saddexaad iyada oo aan loo eegin heerka caymiska.

4.6.2 Si aad ugu qalanto kaalmada dhaqaalaha ee hoos timaada u qalmida aan caddeyn, bukaanku waa inuu buuxiyaa shuruudaha heerka saboolnimada dawlada dhexe ee bukaanada buuxinaya habka codsiga gacanta sida lagu qeexay qaybta 3.0 ee kor ku xusan. Macluumaadka laga helay aalada baarista qolada saddexaad ayaa loo isticmaalaa si loogu xaqiijiyo xaalaadda dhaqaale ee bukaanka waxaana loo isticmaali karaa inay tahay isha kaliya ee dukumiinti ah si loo gaaro go'aaminta kaalmada dhaqaalaha.

4.6.3 Bukaanada loo arko inaysan u qalmin kaalmada dhaqaale iyadoo loo maraayo nidaamka u-qalmitaanka aan caddeyn waxay ku dabaqi karaan nidaamka codsiga gacanta sida lagu faahfaahiyay qaybta 4.2.

## 4.7 OGEYSIISYADA BUKAANADA IYO WAAXDA EE HELITAANKA DARYEEL CAAFIMAADKA IYO XOGTA

4.7.1 Rady Children's waxay:

4.7.1.1 Siin doontaa dhamaan bukaanada aan muujin caymiska dhinaca saddexaad, codsiga Medi-Cal, Healthy Families, Isweydaarsiga Dheefaha Caafimaadka California, ama barnaamij kale oo dawladeed (ilaa inta ay awoodi karto Rady Children's). Codsiyadan waxaa la siin doonaa waaxda bukaanada xaaladaha degdega ah ku jira, Bukaan Socodka Isbitaalka, iyo kahor inta aadan bukaan jiifka laga saarin Isbitaalka.

4.7.1.2 Dhamaan shakhsiyaadka lacagta iska bixiya u sheegi doontaa helida Qiyaasta Saxda Kharashka Caafimaadka (Good Faith Estimate, GFE) kadib marka ay qabsadaan ballan ama kadib marka ay codsi qoraal ah u diraan GFE inta lagu jiro waqtiga lagu xusay Xeerka Kahortaga Lama filaanka oo qeexaya kharashka la filaayo inuu adeega ku baxo iyo xogta Barnaamijka Kaalamada Dhaqaale (FAP) ee Rady Childreniyo FAA, iyo sidoo kale xogta xiriirka ee shaqaalaha Rady Children's si looga caawiyo macluumaadka dheeraadka ah.

4.7.1.3 Ogeysiis qoraal ah siin doontaa wakhtiga adeega la bixinaayo ama kahor inta aan bukaanka caymiska kujira laga saarin isbitaalka, Bukaanada aan caymiska kujirin, bukaanada CSBP ee aan caymiska kujirin iyo bukaanada/damaanad qaadayaasha Lacagta si iskood ah iskaga bixiya diyaar ahaanshaha Barnaamijka Kaalamada Dhaqaale (FAP) Rady Childrenoo ay kujiraan xogta u qalmida, xogta xiriirka ee loo baahan yahay si ay u codsadaan, interneetka loo adeegsado liiska adeegyada isbitaalka ee la iibsan karo, xogta ku saabsan ururada bixin kara kaalmo dheeraad ah siida Ururka Caafimaadka Macmiilka.

4.7.1.4 Gudbin kartaa xeerkan iyo habraaca dhukumiintigaoo ay kujiraan tusmada foomka codsiga FAP waxay u gudbin doonaan Waaxda California ee Helida Daryeelka Caafimaadka iyo Xogta (Health Care Access and Information, HCAI) marka la sameeyo isbadel aad u badan ama marka dhukumiintigala cusbooneysiiyo, ugu yaraan labadii sanaba mar waxayna ogeysiis siin doontaa HCAI haddii aan wax isbadel ah la sameyn.

4.7.1.5 Xeerkaan iyo habraaca dhukumiintigasoo gelin doontaa, xogta kooban oo ku qoran luuqad fudud oo ah dhukumiintigaan, foomka codsiga FAP waxayna soo gelin doontaa webseedka Isbitaalka.

4.7.1.6 Waxay bixin doontaa ayna diyaarin doontaa nuqulada warqada dhukumiintigaan, codsiga FAP, xog kooban oo ah dhukumiintigaan oo ku qoran luuqad fudud

4.7.1.6.1 sameyn kartaa codsi ayadoon wax kharash ah bixin kuna codsanaysa boosto

4.7.1.6.2 iyadoo qayb ka ah iska qorista isbitaalka ama nidaamka isbitaal ka bixita, iyo

4.7.1.6.3 goobaha caamka ah ee muuqda oo ay ku jiraan waaxda daryeelka xaaladaha degdega ah, goobaha bukaanka, xafiiska kharashaadka, Diiwaangelinta Bukaanka, iyo goobaha kale ee bukaan socodka.

4.7.1.7 U sheegi kartaa ama la socodsiin kartaa xubnaha bulshada FAP oo sida macquulka ah loo xisaabiyay si loola xariiro xubnahas ay u badan tahay inay u baahan yihiin kaalmada dhaqaale ee Isbitaalka.

4.7.1.8 Ku dartaa ogeysiis qoran oo muuqda oo ku saabsan bayaanada kharashaadka helitaanka FAP, oo ay ku jiraan lambarka taleefanka xafiiska Isbitaalka ee bixin kara macluumaadka ku saabsan habka codsiga, iyo ciwaanka webseedja halka siyaasadaan iyo nidaamka lagu soo dhejiyay.

4.7.1.9 Adeegyo siin doontaa dhammaan bukaannada muhiimka ah ee aqoontooda Ingiriisiga xaddidan tahay (Limited English Proficiency, LEP) ayadoo siinaysa dhukumiintiga turjuman ee FAP, codsiga FAP, iyo xog kooban oo lagu qoray luuqad fudud ayna siiso bukaanadeeda dadwaynaha kamidka ah.

4.7.2 Medical Foundation wuxuu:

4.7.2.1 Bixin doonaa ogeysiis gaar ah oo FAP marka kharashka lagu dalacaayo bukaanada aan bixin caddeymaha Caymiska Dhinaca Saddexaad. Ogeysiiskaan qoran wuxuu noqon doonaa mid qaab muuqda loo qoraqy ku saabsan bayaanada kharashaadka helitaanka FAP, oo ay ku jiraan lambarka taleefanka xafiiska Isbitaalka ee bixin kara macluumaadka ku saabsan habka codsiga, iyo ciwaanka webseedja halka siyaasadaan iyo nidaamka lagu soo dhejiyay.

## 4.8 DIB U CELINTA KHARASHAADKA DHEERAADKA AH EE BUKAANADA LAGU DALACAY

4.8.1 Rady Children’s wuxuu dib u celin doonaa lacagaha bukaanada ee sida dheeraadka ah loo bixiyay sida ku xusan FAP, oo ay kujiraan lacag dulsaarka ah ee la dulsaari karo muddo 30 maalmood gudahood ah oo laga bilaabo xiliga codsigooda kaalmada dhaqaalaha.

4.8.2 Waxyaabahaan soo socda waxaa loo tixgelinayaa lacag dheeraad ah oo la bixiyay sida ku xusan FAP:

4.8.2.1 Lacag kasta oo bukaan oo lagu bixiyo haraadiga bukaanka/qoyska ee u dhexeeya taariikhda codsiga kaalmada dhaqaalaha la gudbiyay iyo taariikhda la ansixiyay

4.8.2.2 Lacag bixin kasta oo bukaanka la xariirta oo la bixiyo ka dib codsiga kaalmada dhaqaalaha ayaa la oggolaaday haddii ay dhaafto cadadka lagu leeyahay iyadoo lagu salaynayo qiima dhimista lagu sheegay 4.3 qaybta sare. Tusaale ahaan, Mas'uuliyadda bukaanka kadib qiimo dhimista kaalmada dhaqaalaha si khaldan ayaa loo xisaabiyay taasoo keentay lacag bixin dheeraad ah oo khaldan.

4.8.3 Lacagta dulsaarka ah ayaa ku kordheysa lacagta dheeraadka ah ee bukaanka u qalma FAP laga bilaabo taariikhda lacag bixinta ay hesho Rady Children’s.

4.8.4 Lacagta dulaarka ah ee kordhaysa waa 10 boqolkiiba sanadkii xadidka lacag bixinta dheeraadka ah waxaana lagu qiimeeyaa lacag celin kasta oo la soo gudbiyo kahor 1 sano oo laga bilaabaayo taariikhda la helay. Tusaale ahaan, haddii bukaanku/damaanad qaaduhu bixiyo lacag dheeraad ah oo ah $1000 bisha Janaayo 1[deeda] kadibna dib u celinta lacagta la sameeyo bisha xigga ee Fabraayo 1[deeda], waxaa bukaanka fuulaya dulsaar dhan $8.33 marka laga imaado $1000 oo dib u celinaayo.

## 4.9 LIISKA DHAKHAATIIRTA

4.9.1 Dhammaan xubnaha Medical Foundation ee kamid ah Shaqaalaha Caafimaadka Isbitaalka waxaa kharashkooda lagu daboolaa FAP. Rady Children’s waxay liiska dhakhaatiirta Medical Foundation ku haysaa bartaan http://www.rchsd.org/rcssd/.

4.9.2 Dhakhaatiirta xaaladaha degdega ah waxay adeegyada daryeelka caafimaadka ku bixiyaan Isbitaalka ay dabooshay kharashkiida FAP. Rady Children’s waxay liiska Dhakhaatiirta Xaaladaha Degdega ah ku haysaa bartaan http://www.rchsd.org/doctors/?spec=emergency medicine/urgent care.

4.9.3 Waaxda Adeegyada Shaqaalaha Caafimaadka waxay haysaa liiska dhakhaatiirta kore waxaana la cusbooneysiiyaa 90 kii maalmood oo kasta.

4.9.4 Iskaashatada Rady Children’s ee ku xiran dhakhaatiirta banaanka (sida, suuxinta, dhakhaatiirta raajada, iyo dhakhaatiirta isbitaalada) si ay nooga caawiyaan bixinta adeegyada gaarka ah. Dhakhaatiirtaan kharashkooda ma daboosho FAP waxayna yeelan kartaa xeerar kala duwan oo la xariirta kaalmada dhaqaalaha.

## 4.10 DIIDMADA KAALMADA DHAQAALAHA

4.10.1 Rady Children’s waxaa laga yaabaa inay badesho kaalmada dhaqaalaha ee hadda lagu bixiyey nidaamkaan haddii ay go'aamiso bukaanka/Damaanad

qaadaha inuu gudbiyay macluumaad been abuur ah, marin habaabin ah, ama codsiga Caawimada Dhaqaalaha.

4.10.2 Rady Children's waxaa laga yaabaa inay hakiso codsiga Kaalmada dhaqaalaha haddii ay go'aamiso bukaanka/Damaanad qaadaha inuu gudbiyay macluumaad been abuur ah, marin habaabin ah, ama codsiga Caawimada Dhaqaalaha.

4.10.3 Haddii Rady Children's go'aamiso in bukaanku/damaanad qaaduhu uusan u qalmin FAP sida ku xusan xeerka, waxay qaab qoraal ah ugu sheegi doontaa bukaanka/damaanad qaadaha go'aanka diidmada. Waaxda La-talinta Dhaqaalaha waxay fududeyn doontaa nidaamka iyo boostada xiriiradaan lagu sameynaayo.

4.10.4 Rady Children's waxa laga yaabaa inay badesho kaalmada dhaqaalaha ee hadda lagu bixiyey xeerkaan si loo hakiyo go'aanka kama dambaysta ah ee u-qalmitaanka FAP si waafaqsan Qaybta 4.3.1.10. Ka noqoshada sida waafaqsan qaybtan 4.10.4 kama dhalanayhso wax mas'uuliyad dhaqaale ah oo dheeraad ah oo la saanaayo bukaanka ama dammaanad qaadaha, iyo dhammaan lacagaha uu bixiyo bukaanku ama dammaanad qaaduhuna waa la soo celin doonaa iyadoo la sugaayo go'aanka ugu dambeeya ee u-qalmitaanka FAP. Warqad ayaa loo diri doonaa bukaanka ama dammaanad qaadaha lagu ogaysiinaayo sababta lacagta loo celinaayo iyo in lacag-bixinta bukaanka ama dammaanad qaaduhu la sii wadi siin doono muddo kadib haddii xallinta arrinta TPL iyo go'aanka kama dambaysta ah ee FAP ay u aragto bukaanka ama dammaanad qaadaha inay dhaqaale ahaan masuul iska noqon karaan.

4.11 **KHILAAFAADKA U QALMIDA**

4.11.1 Rady Children's waxaa laga yaabaa inay diido u qalmida Daryeelka Samafalka ama Qiimo dhimista Lacagaha ayadoon mid kamid ah sababahaan ku saleyneysa: 1) in bukaanku dhaqaale ahaan uusan u qalmin ama 2) in bukaanka/damaanad qaaduhu uusan bixin dukumiinti loo baahnaa oo waafaqsan nidaamkaan iyo habraacaan.

4.11.2 Rady Children's waxay magacawdaa Agaasimaha Hawlaha Bukaanka si uu dib u eegis ugu sameeyo khilaafaadka khuseeya u qalmitaanka. Khilaafka u-qalmitaanka waa in loo gudbiyaa Adeegga Macmiilka Isbitaalka oo lambarkoodu yahay 858-966-4912 si loo helo dukumiinti iyo dabagal. Adeegga macaamiisha ayaa khilaaf kasta u gudbin doona Agaasimaha Hawlaha Bukaanka si uu u eego.

4.11.3 Rady Children's waxay xaddidaysaa hawlaheeda ku aadan uruurinta deynta si waafaqsan xeerarkeeda Kharashka & Uruurinta Deynta.

4.11.3.1 Nuqul bilaash ah oo la xariira xeerkaan ayaa la heli karaa marka lala xariiro Xafiiska La-talinta Dhaqaalaha oo lambarkoodu yahay 858-966-4005 ama barta https://www.rchsd.org/patients-visitors/financial-assistance/. Nuqulka sidoo kale waxaa lagu heli

karaa boostada iyadoo codsi loo diraayo Xafiiska La-talinta Dhaqaalaha 3020 Children's Way, MC 5055, San Diego, CA 92123-4282 iyo sidoo kale goobaha dadweynaha ee isbitaalka.

4.12 **QIIMEYNTA BAAHIYAHA CAAFIMAADKA BULSHADA/FALANQEYNTA DHEEFTA BULSHADA**

4.12.1 Rady Children's waxay qabataa Qiimeynta Baahiyaha Caafimaadka Bulshada ee sannadlaha ah/Falanqeynta Dheefta Bulshada, taas oo laga heli karo bartaan http://www.rchsd.org/health-safety/community-health-needs-assessment/.

## 5.0 FOOMAMKAAN:

5.1 Codsiga FAP (Daryeelka Samafalka/Bilaashka ah ama Qiimo dhimista Lacag Bixinada)
5.2 Soo koobitaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale (FAP)

## 6.0 XEERARKA LA XARIIRA:

6.1 HPM 7-55, Qiimaynta Macquulka Isbitaalka iyo Dhakhtarka Xaalada Degdega ah (ED)
6.2 HPM 7-56, Biilka iyo Uruurinta Deynta

## 7.0 TIXRAACYADA:

7.1 California AB 774 (2007), AB 1503 - Farqada 445 (2010), SB 1276 – Farqada 758 (2014)– Sharciga Qiimaynta Macquulka Isbitaalka (Xeerka Caafimaadka iyo Badqabka 127400- 127446), AB 532 (2022)
7.2 Title 22, Xeerarka Sharciga California, §§ 96005-96020, 96040-96050
7.3 https://hcai.ca.gov/HID/Products/Hospitals/Chrgmstr
7.4 Xeerka Caafimaadka iyo Badqabka §§ 1339.55, 1339.56, 1339.59, 1339.585 & 128770
7.5 Xeerka Ilaalinta Bukaanka iyo Daryeelka Qiimo ahaan La Awoodo
7.6 Xeerka Dakhliga Gudaha Qaybta 501(r)

Taariikhda La Qoray: Janaayo 2013
Taariikhda Dib u eegista Lagu Sameeyay: Nofeembar 2019, Janaayo 2020, Maayo 2021, Maarso 2022, Sebteembar 2022, Luulyo 2023
Taariikhda Dib loo eegay: Sebteembar 2022